# Martabadaha Shaqada iyo Xaquuqdaada

Job Status and Your Rights

## Waa maxay sababta ay muhiimka u tahay nooca ay shaqadaydu tahay?

Martabadaada shaqadu waa waxa sheega nooca shaqaalaha ah ee aad tahay. Waa muhiim in la ogaado arrintan waayo xaquuqdaada shaqada waxa ay ku xiran tahay martabadaada. Martabada shaqadaadu waxay kaloo saameysaa dheeftaada iyo canshuurta.


## Ma waxaan ahay shaqaale mise qandaraase madax banaan?

Midka aad tahay labada waxaa qeexa sharciga. Inta ay le'eg tahay xukunka qolada shaqada ee shaqadaadu badanaa waxa ay muujisaa inaad tahay shaqaale ama qandaraasle madax banaan.

- **Shaqaale:** Waxa ay u badan tahay inaad shaqaale tahay hadii shaqadu ay iyadu xukunto shaqada aad qabanayso. Inta badan, hadii aad shaqaale tahay, mushaar joogta ah ayaad qaadataa ee ma aha in lacag lagu siiyo kolkaa hawl gaar ah aad soo dhamayso. Jeegaagana canshuur laga gooyo, waxaana dhici karta in gunooyin kale aad hesho.

- **Qandaraaslaha madaxa banaan:** Qandaraaslaha madaxa banaani waa ganacsi iskii u shaqayasta. Hadii aad tahay qandaraasle madax banaan, waxa aad badanaa ogolaataa inaad hawl ku qabato waqti ama qiimo cayiman. Shirkada aad shaqada u qabanaysaa ma ay goyso iyadu inta saacadood ee aad shaqaynayso maalintii, maalmaha aad shaqaysayso kuumana sheegto sida loo sameyanayo shaqada. Waxay u badan tahay inaadan helin wax guno ah ama canshuur ka jirid lacagtaada ah. Waqtiga aad tahay qandaraasle madax banaan laguma daro xisaabta manfacyada shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo ama sooshal sakuuratiga aan ka hayn inaad **adigu** canshuur ka bixiso waxyaabahaa adigoo qof iskii u shaqeyste ah.

Qolo shaqo waxaa dhici karta inay kuugu yeeraan inaad tahay qandaraasle madax banaan si ay ay iga dhuuntaan waajibaadka sharciyankan shaqaalahooda ka saaran. Waxaa dhici karta in ay isku dayayaan inay ka badbaadaan bixinta canshuurta shaqada, lacagta dheeriga ah ee waqtiyada siyaadada ah lagu shaqeeyo, lacagta ugu yar ee lagu shaqeeyaan, bixinta caymiska xaqqa shaqaalaha shaqada ku dhaawacma iyo waxyaabo kale. Hadii aad dhabtii shaqaale u tahay sida sharcigu dhigayo, laakiin ay qolada shaqadaadu kuula dhaqanto sidii qandaraasle madax banaan oo kale, waxa ay kolkaa jabinayaan sharciga.



Hadii aad qabto inay tahay in laguu tixgeliyo shaqaale inaad tahay, waxa aad u askhtakoon kartaa Waaxda Shaqada iyo Meheradaha ee Minnesota (Minnesota Department of Labor and Industry), Wasaarada Shaqada ee U.S. (Department of Labor), ama adiga oo adeegsanaya qareen sharciyada shaqada qaabilsan.

## Ma waxaan ahay shaqaale rasmi ah mise mid ku meelgaar ah?

Sharcigu ma uu qeexo cidda ku meelgaarka ah ama cidda rasmiga ah. Qoladaada shaqada ayaa go'aansata hadii ay doonayaan inay kaa dhigaan shaqaale ku meelgaar ah ama mid muddo dheer ah. Hadii aadan hubin in shaqadaadu ay tahay ku meelgaar iyo in kale, ka hubi qoladaada shaqada.

## Ma waxaan ahay shaqaale saacado buuxa shaqeeya mid saacado yar shaqeeya?



- **Shaqada Saacadaha Buuxa ah**
  Shaqaalaha saacadaha buuxa shaqeeyaa badanaa waxa uu shaqeeyaa 31-40 saacadood asbuucii. Qolyaha shaqada iyaga ayaa gooya jadwalka saacadaha buuxa ah ama midka saacadaha yar ah. Arrintan sharcigu ma uu gooyo.

  Qaar badan oo qolyaha loo shaqeeya ka mid ah oo leh barnaamijyo guno sida fasaxyo, iyo kaar caafimaad kaliya waxa siiyaan gunooyinkaa shaqaalaha saacadaha buuxa shaqeeya.

  **Ogow:** Sharciga Kaarka la Goyn Karo (The Affordable Care Act) ama "Obamacare" inta badan waxa uu faraa shaqooyinka inay siiyaan kaar caafimaad cid walba oo shaqeysa 30 saacadood ama ka badan asbuucii ama 130 saacadood ama ka badan bishii haddii qoladda shaqaddu ay leedahay 50 ama in ka badan oo ah shaqaale saacado buuxa shaqeeya. Haddii aad shaqeyso cadadkan ama aad hesho manfacan waxay u badan tahay kolkaa inaad tahay qof saacado buuxa shaqeeya.

  **Ogow:** Manfacyada shaqaalaha shaqo la'aanta ah la siiyo wixii 32 saacadood ah ama ka badan ah ayey u xisaabiyaan saacado buuxda. Eeg warqadayada xogta aruursan ah ee *Helida Lacagta Shaqaalaha Shaqo La'aanta ah la siiyo*.

- **Shaqada Saacadaha yar ah**
  Shaqaalaha saacadaha yar shaqeeyaa waxa ay badanaa shaqeeyaan 1-30 saacadood asbuucii. Qolyaha shaqada iyaga ayaa gooya jadwalka saacadaha yar. Arrintan sharcigu ma uu gooyo.


  Qaar badan oo qolyaha loo shaqeeya ka mid ah oo bixiya gunooyin ma ay siiyaan wax gu nooyin ah shaqaalaha saacadaha yar shaqeeya.

Qolada shaqadu ma aha inay kuu diidaan manfacyada iyagoo kugu oranaya waxa aad shaqeysaa saacado yar, hadii dhabtii aad shaqeyso saacado buuxa.

**Su'aalo?**

Waaxda Shaqada iyo Meheradaha ee Minnesota (MN Department of Labor and Industry-DLI)
www.dli.mn.gov
(651) 284-5005 or 1-(800) DIAL-DLI (1-(800) 342-5354)

Wasaarada Shaqada ee U.S. (Department of Labor)
www.dol.gov/whd
1-(866) 4-USWAGE (1-(866) 487-9243)



***Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen.*** *Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambeysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.*

**© 2026 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.**